

**WAXAAN AHAY BUKAAN AAN IKHTIYAAR LAHAYN  
OO KU JIRA ISBITAAALKA DHIMIRKA.  
WAA MAXAY XUQUUQDAYDA?**

Bukaanka aan ikhtiyaarka lahayn waxaa loola jeedaa in lagu seexiyay ama lagugu haayo isbitaalka adiga oo raali ka ahayn iyadoo loo marayo amar xiritaan ama “shaqo ka cayrin.”

**Maxaa dhacaya haddii la i geeyo qaybta dhimirka ama isbitaalka iyadoo aan raali ka ahayn?**

- Mar haddii si ikhtiyaarkaaga ahayn lagugu seexiyay isbitaalka, waa inaad sameeysaa qiimeyn dhimir 24 saacadood.
  - Haddii isbitaalku aanu ku soo saarin ka dib qiimayntaada, wuxuu haystaa saddex maalmood oo maxkamad si uu u soo gudbiyo codsi lagugu xayirayo.
  - Ka dib markii isbitaalku soo gudbiyo codsiga xayiraada, waxaa la qaban doonaa dhagaysi dacwad maxkamadeed oo buuxa.
  - Waxaad xaq u leedahay qareen ay maxkamaddu u xilsaartay dhageysiga dacwadaada, waxaadna xaq u leedahay inaad ka qeybgasho dhegeysiga dacwadaada.
  - Waxaad xaq u leedahay qiimeyn dibadeed.
  - Isbitaalku waa inuu u caddeeyaa maxkamada in aad halis ku tahay naftaada ama dadka kale.
  - Haddii aad tahay bukaan ikhtiyaar aan lahayn, waxaad wali ka codsan kartaa sii-deyntaada isbitaalka.
  - Si aad uga codsatid sii-deyntaada isbitaalka, waa in aad marka hore gudbisaa codsi diiwaangelin mutadawacnimo ah.
  - Waxaad wax ka weydiin kartaa sarkaalka xuquuqda macaamiisha codsigan.
  - Haddii la ansixiyo, waxaad noqon doontaa bukaan ikhtiyaar ah. Waxaad markaa codsan kartaa sii-deyn adoo buuxinaya warqad saddex maalmood ah.
  - Waxaad xaq u leedahay inaad codsato xaaland diiwaangelin mutadawacnimo ah waqt kasta.
  - Isbitaalka loogama baahna inuu oggolaado codsigaaga diiwaangelinta ee ikhtiyaariga ah.

Xusuusnow!

- Waxaad xaq u leedahay inaad u gudbiso cabasho isbitaalka wakhti kasta.
  - Waydiiso sarkaalka xuquuqda macaamiisha inuu kaa caawiyo qudbinta.